

DHEEMANTI
AASNAYD !
BASHIR MIKHA'IL

”

Waan kujeclahay markii aan noolahay. Markii aan kujeclahayna waxaan dareemayaa in aan dhimanayo, markii aan dhintana waxaan dareemayaa in aan kujeclahay, haddii aan kujeclahayna waa aan noolahay wali !

# DHEEMANTII AASNAYD !

Waxaan ku noolaan jiray aagagaarka magaalo kutaal waqooyiga dhulkii uduga[1]. Hooyo wanaagsan iyo sidoo kale nolol aan is bedelayn illaa aan ka dhinto ayaan haystay. Abbaarahaas lajoogay waxaan wax ka akhrin karayay buugaagta jacaylka, sababtoo ah waxaa igu furnaa cidlo ubaahnayd wehel waara. Balse maskaxdayda oo qallafsanayd ayaa waxaasi u aragtay mala'awaal. Maxaa yeelay mala'awaalka waxa aan jirin iyo in ay waxaasi rumoobaan waa qanaadiir ay iinsaanka oo idil jecelyihiin, qaarkoodna waxay udhigtaan dhalashooyin khaas ah iyo waxay ugu yeedhaan **happy birth day**. Amminkaas ay aadanuhu raaceen baahida mala'awaalkaa iyo inay dabo-dhoon u- noqdeen dhalashada xigta dhimashada. Ayaan anigu markaa si nool u sare joogsaday, waxaa boodh iyo dabato badan ka daadatay qalbigaygii, oo ar- dhawalaaba aanan judh-dhaaba arag dareenkan qabawga ah iyo saxan-saxadan wadata carafta dheeman in muddaa ku aasnaa buuraha guntooda, cidina ay gaadhi wayday.

Qalbigaygu wuu ogolyahay dheemantaan aan dhannaba loo dhaafi karin, balse maskaxdaydu iyadu waa ay diidantahay arinkaa sidii aad ogayn-deenba, sabab laakiin ! ? Dabcan argumantigeedu wuxuu abbaarayaa dareen silloon oo si waasac ah u fog, waa dareen ka shidaal qaata falsafadda iyo fikradaha xag-jirka ka ah in naag la aasan sharteeda aanan sinnaba lagu sad-raacin karin maskax rabta inay sifayso si' unoolaansheheeda, waliba sidii larabay. "Ugu yaraan waxaa jirta shar ay dibadda ugu soo baxday dheeman lagu sheegtaan" ayay tiraabaysaa maskaxdaydu, walina tix kalena umuhanaysaa.

---

1 Deegaan beereed kuyaal waqooyiga soomaaliya.

Dheemaneey waxay tani umuuqataa in maskaxdu ay ka arradantahay waasacsanaanta dabcigaaga iyo quwada quruxdaada. Ma oga in carafta uunka dhan laga dareemay ay tahay tan aad lasoo if baxday. Wuxu waa maskax, Haa oo maysan daraasayn jirridaha jacaylka iyo jamaalka inan walboo la aasan waxa aan dareemay anigu. Dheemantii aasnaydeey, ma waxaad ku dhex aasnayd dhulkii aan kudul socon jiray dharaar walba anigoo dhursugaya dheeman adoo kalaa? Hagaag arimahaas ama dhursugiddaasi waa waxa iga dhigay ruuxa aan maanta ahay mayee aan caawaba ahay.

Anigu waxaan laqabsaday sida aan iminka ahay, intii aanad ii imaan kahor waxaan ka fikiriyay dareenka xooggan ee sidii daadka ii qaaday, sidii saxansaxadana ii saaqay, islamarkaana aan ka dareemayay hal meel. Aad baan arintan ugu hiloobayaa in aan ka sal gaadho, waliba adiga dartaa, maxaa yeelay qalbigaygu waa uu ka mug waynaadey isla intii hore ee uu ahaa, culayskiisu waa uu i dhibayaa. Waxaana ii dheer baqasho. Isbedalka waan dareemayaa, balse waxaa dhib igu ah qalbigaygu ma yaqaan sida isbedelka loola macaamilo. Balse tani waa **raqmu-anfi**.

Noloshu way ii wanaagsanaatay kolkii aad riyadayda kasoo muuqatay, waxaan dareemay in la igu abaal mariyay dedaalkeygii siduu u dhammaaba.

Baaxaa-dag badan iyo mudac maskaxeed kadib, guushu garbahayga ayay u hooyataa iminka, iyadoo ay dheemantiina wehlinayso. Iminka culays badan garbahaygu ma dareemaan, qalbigaygu wuu xasilanyahay, maskaxdayduna waa ay aqbashay waxa la yidhaahdo jacaylka iyo inantan quruxda la aasaan.

Si wada jir ah ayaan hab isku siinay. Waa markii ugu horaysay oo aan caraftii saxda ahayd dhadhamiyo, waana markii ugu horaysay oo ay istaabtaan jidh baxnaano badani ay ka muuqato iyo mid jir dilan oo jamasho badani ay ka muuqato, waa kayga'e. "Waan soo noqonayaa muddo gaaban kadib", ayaan ku idhi cod uu silic badani ka muuqdo, iyadiina way aqbashay "Hawraarsan" ayay cod daganaani ka muuqato ku tidhi. Waxayna ii raacisay "inkastoo aanan kamid ahayn hablaha deegaanka, haddana waxaas oo idil kolka laga fogaado waxaan ahay inan kujecel ina ragoow.

Socdaalkani wuxuu iila mid ahaa mid habaaran, aad ayaana u kahanayay in aan ka ag- fogaado ruuxan aydaanin arag sancada uu alle usameeyay. Waa makhluuq kutusinaya karaamada alle iyo sanacada uu sameeyo cidda uu doono. Waa bashar la ishdihi karo dunida waxay ujoogta fitnada ragga. Runtii waa abuur cajiib ah dhedig ahaanshaheedu. Hadda ka hor waxaan dumarka iyo jacaylkaba ku eegi jiray indho boholyoow wata, balse iminka waxaan ku eegaa arag wata  rajo iyo raasamaal marna aanan khasaarayn.

Socdaalkii waa uu bilaabmay, waxkastaana waa ay isbadaleen. Qalbigaygii wuxuu dhex ruqaansaday dhul uusan ka helayn caraftii dheemantii wacnayd. Si lamida sidaas iyaduna deegaanka ay joogto wax macnaa uma samaynayo si lamida sidii hore. Addoonkii ay jeclaydna masii joogi doono dhulkan uduga ah iyada darteed. Laaskuna masii ahaan doono laaskii kulanka iyo meersashadii sheeko faneeddii qoraagii falastiineed ee **maxamuud darwiish**, oo ay wada jeclaayeen inanka iyo inantu. Runtii waxay ahaayeen labo qofoo noloshu fahantay halkii ay iyagu nolosha fahmi lahaayeen. Cajiib ! !

Safarro dhaadheeraa iyo socdaal qaatay wax kabadan saacado, waxaan tagay dhul aan ahayn midkii aad idinkuba ila taqaanaydeen. Balse waxkasta waan haystay marka laga yimaado wacantii aan jeclaa. Fariimo soo jiidasho leh iyo codad kamacaan badnaa malabka ayay dharaar walba dhagtayda soo gaadhsiinaysay. Dhunkashadana waxay si iskeed ah isoo raacsiinaysay dabaysha kasoo dhabata deegaanka iyo goonyihiisa, iyadoo rajaynaysa in ay dabayshaasu wajigaya sudho dhunkashadaas, islamarkaasna ay iisheegi doonto in ay isugi wayday oo ay i fogaysatay, hadii loo baahdana ay ii sugayso sida ay inani usugto nin karmeed dhiiran oo ku raadjooga wixii iyada udhixi lahaa. Maalintaa kadib waxay dabayshaasu ooga dhignayd hal wax oo kaliya: rejada soo noqoshada gacaliyeeda.

Maxaad umalaynaysaa in aan iyada ooga baahanahay? Waxaan rabaa in aan naftayda ugu deeqo waliba si walwal la'aan ah. Tani waa aragti xor ah, ma ahan jacaylkani midkii aad taqaanaydeen ka bulsho ahaan.

Joogitaankeedu wuxuu ahaa mid ku dareensiinaya riyo durugsan, isla mar ahaantasna sandulle kaaga dhigaysa in aad adeecdo ama aad buugaag ka qorto. Dabcan waxaan ugu xiisayay sidii in aan kasoo baxay dunidii rooxaanta iyo baqawga daran. Waan nafisay oo farxay. Waxaan qaadayay tallaabooyin muujinaya in aanan waayin, balse iyadii ayaa ii sharaxday in wadnaheedu badanaaba uu tixgaliyo agjoogayga, kaasoo xummida ka caagan, sababtoo ah dareenka ugu wayn ee aan qabaa waa hillawgaaga.

Dadku waxay ii yaqaanaan nin karmeed dantii yaqaan ah, sidoo kalana aan ahay nin yaqaan daryeelka dumarka, balse ma

aqaano sidii aan ugu guulaysan lahaa arinkaas. Waxaan isku dayayaa in aan dunidoo dhan gaadhsiiyo xikmadda ay leedahay in adigoo kale la jeclaado, islamarkaana aysan cidina awoodi karin in ay lajaanqaado quruxdaada.

Iminka qalbigaygu wuxuu u muhanayaa si uusan waligii umuhan. Waa gabadhaas dhediga wax dheer darteed. Laakiin waxaa jirta su'aal dhawrasa in laga jawaabo, " waa maxay sababta aan habeenimadan usoo jeedo, halka ay iyadiina hurdo dheer la dhacsantahay"? Jiil ka jiil akhristayaasha nuqulkan waxay kasheekayn doonaan halyaynimada qalbi si waasac ah ujeclaaday inan, darteedna ugalay saama-layl badan, hanashadeediina ku raad joogay, waliba si kabaxsan xayndaabkii caadiga ahaa.

"Waxkasta oo hal mar dhacaa waligii mar labaad ma dhaco, balse wax kasta oo labo jeer dhacaa hubaal waxaa ah in uu mar saddexaadna dhici doono" ayuu qalbigayii is warsaday, laakiin tani waa odhaah uu hadda kahor ku arkay buugga **PAULO CEOLHO** ee **ALKIMISTAHA.** Dabcan si wayn ayay u muuqanasaa arintani. Maxaa yeelay xusuuyadu way is weheshadaan.

Dadku waxay ka sheekeeyaan waaqic xumada jacaylka iyo in uu yahay wax aanan sinnaba u suurtoobayn haddii la la isku dayo in laga sal gaadho, balse qalbigaygu wuxuu iisheegayaa in ka cabsashada jacaylku ay tahay kadeednimo nafeed, isla markaana aanu jirin qalbi waligii kunoolaan kara nolol jacayl la'aan ah, sababtoo ah ilbidhiqsi kastaa oo jacaylka kamid ahi waa ku raadjoogidda riyooyin inay rumoobaan udhaw.

Hadal walbaa oo aad ku tiraahdo qofka aad jeceshahay waxay ka dhigantahay laab-xaarnaan iyo in aad wali qof nool tahay. Doorashooyinka jacaylku waa kulan lamafilaan ah. Dhab ahaantii qofna maanu dooran qofka uu jecelyahay ee waa qasnad qaaliya oo xagga eebbe ka timid. Sidee ayay marka qasnaddaasu wax uburburin? Waa sinnba.

Intii aan bartay jidadka jacaylka waxaan helay riyooyin aanan waligay ku riyoodeen haddii aanan ahaan lahayn qofka aan ahay hadda. Intaa kadib qalbigaygii ayaa wax dheeraad ah iisheegay, wuxuu isheegay nuxur wax ku'oola oo ka yimid dhankaaa iyo ruuxda jacaylka. "In dhammaan kuwa aaminsan jacaylka ay yihiin kuwa ugu farxadda badan dunida ayuu iisheegay, maxaa yeelay kuwaas jacaylku wuxuu lasoo bilaabmay illaa iyo abuuritaankoodii. In uu faraxsanaadana waxay ahayd **azali**.

Qofkasta oo innaga naga mid ah waxaa udiyaarsan ruux hanashadeedu aysan cid kale kaga horayn. Balse kuwa inkiray jacaylka ayagu quudkaas waxba kuma laha, qasnaddaasuna way ka dahaadhantahay. Annagu ka qalbiyo ahaan kol kol ayaynu isku daynaa in aan dadkaas qancino, balse abuuritaanka afkaarta ayaa kaga horeysay hanashada ruux jacaylkeedu uu gadaal kagayimid. Balse kaliya kuwa wax fahmayaa ayaanu kala hadalnaa arimahan." Intaa wixii kadambeeyay qalbigaygii waan isfahannay, waxaana ka codsaday in aanu waligii hakin jacaylka inantaas.

"Socodkaada usii wad dhanka jacaylka, sidoo kale sii wad in aad udhug lahaado ifafaalooyinka jacaylka. Qalbigaagu wuxuu awoodaa in uu korkaaga sudho ahraamta jacaylke'e. Waa halahaas halka aad wali ubaahantahay in aad ogaato." ayuu yidhi mar kale.

Ogoow inta aanad xaqiijin jacaylkaaga, in ruuxdaadu ay diyaar utahay burbur, sidoo kalena aad wajihi karto imtixaan aan la koobin. Jacayl kastaa wuxuu ku bilawdaa nasiib bilaabmay, waxaanu ku dhammaadaa guul dacar loo soo dhadhamiyay. Dadku inta badan tan mafahmaan, sababtoo ah tani waa wax qalbiyada dadka aad u kadeeda, qalbiyada dadkuna ma jecla in ay kadeedmaan.

Gaba-gabadu waxay tahay in aan kusuganahay bilawgii aan ku raaxaysanlahaa jacaylka, dhab ahaanna aan u gudhan lahaa dhaxalka kuwii na-haleelsiiyay xikmadda iyo hal-abuurka jacaylka. Taladu waa in aad usoo baxdo maayadaha ruuxda dunida iyo kal furnaanta kalgacalka iyo dhammaan sooyaalka dadka oo dhami ay si' uun ugu xidhiidhaan.

Jacaylku mar kale  waa soo bixitaan ay ruuxdu usoo ban-baxdo maayadaha caalamiga ah ee nolosha, halkaas oo gebi ahaanba laga helo neecawda naga wada maqan. Dunidii hore jacaylka waxay utaqaanay **barako**, halka dunida cusubina ay utaqaano **dareen.** Waa dareen usiman dunida horumartay iyo tan saboolka ahba, caabidka iyo caasiga, caalimka iyo caamayga, waayeelka iyo dhallaanka, basharka iyo bahaa'inka. Wax la'aan iyo waxkasta**.**

**"Haddii aanad wax jeclaan waxaad ka cabsandoontaa jiilaalka"**

**~maxammud darwish**